

Hiigsiga:

In aynu nolosha wax-ka-beddelno anagga oo bixinayna taageero oo dhiirrigelinayna iskaashiyada awoodda u siinaya dadka in ay ku noolaadaan nolosha ay rabbaan.

Himilada:

Taageeridda shakhsiyaadka si ay ugu noolaadaan, wax ugu biirriyaa, oo ayna uga qaybqaataan bulshooyinkooda; Si joogto ah in loo sii wanaajiyo taageerada la siiyo qoysaska carruurta iyo dadka waaweyn; Ka dhigista mid gaar ah taageerada awoodda siisa shakhsiyaadka leh naafonimooyinka koritaanka si ay u gaaraan awoodooda ugu badan; Dhisidda qorsheyaasha taageerada oo ku saleysan baahiyada iyo awoodaha shakhsiga iyo qoyska; iyo La shaqeynta shakhsiyaadka, qoysaska, bixiyeyaasha adeegyada maxalliga ah, bulshooyinka la-hawlgalayaasha dowladda iyo daneeyayaasha kale in aan sii wadno sii wanaajinta nidaamkeenna taageerada.

Qiyamka:

Ixtiraam, Qorsheynta Adeegga Shakhsiga Xuddunta u Yahay, Iskaashi, Ka-qaybgalka Bulshada

Qiyamka Hagaya:

U-dhammaansho, Xaaladda iyo Wax-ku-biirrinta, Xiriirrada, Awoodda iyo Dookha, Caafimaadka iyo Bedqabka, Kartida

Additionally, the following information from our home page needs to be translated:

Dadka qaba naafonimada koritaanka iyo qoysaskooda waa muwaadiniinta la qiimeeyo ee gobolka Washington. Maamulka Naafonimada Koritaanka wuxuu ku dedaalayaa in uu sameeyo oo fuliyo siyaasadaha dadweynaha kuwaas oo kor u qaadaya qiimaha qofka, ixtiraamka-nafta, iyo sharafta si qof kasta loogu qiimeeyo ahaanshaha uu yahay xubin ka mid ah bulshada. Qiyamka Hagaya Naafonimada Koritaanka waxay ka kooban yihiin himiladeenna iyo qiyamkeenna loogu talagalay bulshooyinka loo dhan yahay.

Haddii aad rabto macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada, eeg Warbixinta Kharashka iyo Tirada Kiisaska ee Maamulka Naafonimada Koritaanka ee 2021. Xadgudubka ku soo sheeg barta internet-ka ama telefoonka.